

Badhitaanka TBda ee cisbitaalka

Baadhiitanka HIVga waad kala xajjoon kartaa dhakhtarka ama kalkaliyaha sida gaarka ah loogu carbiyey TBda. Warbixinta oo dhanna waxa laga dhigayaa qarsoodi. Haddii lagugu baadho dhakhtarka TBda jawaabta waxa lagu kaydinaya faylkaaga dhakhtarka. Taas macnaheedu waxa weeye dhakhaatiirta iyo kalkaliyaasha ku hawlan daryeelkaaga wey arki karaan laakiin cidkale ma arkeyso.

Baadhiitanka dhakhtarka Daaweynta Xubnaha Galmaada ee xaafadda

(Warbixin dheeraada kala xidhiidh kalkaliyaha Tbda)

- Dhakhtarada qaar bilaabal ayaa ugu tegi kartaa oo aad dhakhtarka ku arki; qaarna waa inaad balan samaysataa
- Warqad uma baahnid inuu dhakhtar ka kuu soo qorey
- Cisbitaaldani waxay leeyihiin sharchiyo culculus oo sir ah
- Qoraaladaada lagu dhaafio cisbitaalka waxa akhrisan kara oo kaliya shaqaalaha halkaa jooga.
- Jawaabta la siinmaayo GPagaaga
- Ma aha inaad sheegatid magacaaga, taariikhda aad dhalatay ama cinwaankaaga saxa ah ee laakin ha ilaawin waxaad qoratid
- Haddaad rabtid inaad cisbitaal kale baadhiitanka ku qaadatid wac Khadq bilaashka ah ee Caawimada AIDS EE Qaran 0800 567 123
- Waxaad kaloo baadhiitanka ka heli kartaa GPagaaga
- Si kasta ha ahaatee warbixinta ah inaad qabtid HIV ayuu GPagaagu u gudbin karraa shirkadaha caymiska ee nafta iyo caafimaadka haddaad dalab samayneysid. Haddaad daneyneysid tan waxa fiican inaad isku baadhid dhakhtarka GUM (Daaweynta Xubnaha Galmaada)

Ka ilali qaatada qoyskaaga iyo saaxibadaa - wada qaado dawooyinka

Meelaha kale ee taloooyinka ku saabsan baadhiitanka

**Khadka-caawimada AIDS ee Qaran
(National AIDS Helpline)**

0800 567 123

**Khadka-caawimada AIDS ee Afrika
(African AIDS Helpline)**

0800 0967 500 (websaytka: www.africaninengland.org)

Terrence Higgins Trust Helpline

0845 12 21 200 (websaytka: www.tht.org.uk)

Positively Women Helpline

020 7713 0222 (websaytka: www.positivelywomen.org.uk)

Blackliners Helpline

020 7738 5274

Khadadka muhiimka ah ee caawimada (Mainline Helpline)

020 7582 5434 (websaytka: www.mainliners.org.uk)

TB Alert waa hay'adda kaliya ee samafal kuna taal UK ee kor u qaada ogaalka qaatada aduunweynaha kuna caawisa NHSta iney warbixin siiso bukaanka. Waanu taageernaa mashaariicda hubinaysa iney dadka buka ee wadamada soo korayaa heleen daawyn iyo wacyigelin saxa. Hadaad na taageerto saamayn la taaban karo ayaanu u geysaneynaa TBda aduun weynaha dad badana wuu badbaadi.



TB Alert,
Community Base,
113 Queens Road,
Brighton BN1 3XG
Tel: 01273 234030

Wixii warbixin dheeraada ah iyo nuqulka warqaddan, fadlan kala xiriir 01273 234 770 (xiliga shaqada oo kaliya).

Sii aad deeq ama iska-wax-u-qabso u tartid TB Alert,fadlan kala xiriirt 01273 234 784 (xiliga shaqada oo kaliya).

Ama gal websaytkaya www.tbalert.org

Warbixin warqaddan ku qoran ee ku saabsan baadhiitanka iyo daaweynta Qaaxada waxa loola jeedaa warbixin guud uun, loolama jeedo iney kuu bedesho aqooniti iyo xifaddil iyo go'aamintii ay lahaayeen dhakhaatiirtu, faramsilliyasha iyo/ama aqooyahanada kale ee daryeeka caafimaadka ee daryeela bukaanka. Warbixin kaliya oo warqaddan ku qoran looguma talo gelin go'aaminta baadhistaa ama daaweynta. Si'alaaha iyo wixii khuseeyaa ee ku saabsan baadhistaa, daaweynta waa in loo gudbiya aqoonyahanada daryeelka caafimaadka.

Shaqada horumarka aasaasiga ah ee Shabakeda North London TB

A company limited by guarantee Registered in England No. 3606528 Registered Charity No. 1071896 design: worksong, London 020 8352 8300



Baadhiitanka muhiimka ah ee dadka qaba qaaxada (TB)



Sideebay HIV iyo AIDS u saameynayaan TBda?

Badanaa daka UK jooga ee TBda qaba hadana ma qabaan HIV. Si kasta ha ahaatee, wadamada qaar ayey badanaa is raacaan HIV, AIDS iyo TB, HIV wuxuu waxyelaa iska caabinta jidhka, markaa wuxuu ogolaadaa in TBdu si fudud ugu dhacdo.

Dadka qaarbaa TB ka qaada wadamada ay ku badantahay TB iyo HIV. Markaa labadan xanuu aad bay isugu xidhanyihii - qofka mid ahaan qabaa ka kalena waa u halis.

Waa maxay HIV/AIDS?

- ◎ HIV waxay u taagantahay Awooddarida-iskacaabinta Fayraska (Virus) ee Aadama.
- ◎ HIV wuxuu wax yeelaa iska caabinta jeermiska kale ee jidhka, badanaa infekshan.
- ◎ Cudurada qaar hadday ku dhacaan qof qaba HIV markaa wuxuu qabaa AIDS.

HIV sidee buu joogto u yahay?

Adduunka oo dhan waa laga helaa HIV. Laakiin waxa jira meelo uu ku badan yahay - sida Sab-saxaaraaha Afrika, Koonfur Aasiya iyo Bariga Yurub - HIV waa joogto.

UK gudaheeda waxa lagu qiyaasaa in 30,000 qof qabaan HIV tiraduna way sii kordheysaa sannadkan waxa laga helay 6500 qof waa markii ugu horreysey ee sannad walba ay intaas korodho. Adduun weynaha, sida uu ku fidaa HIV waa galmaada ragga iyo dumarka, hase yeeshee kiisas cusub ayaa laga helay ragga isu taga in xaaladdu aad u sarreysa.

Wax daawo ah ma leeyahay HIV iyo AIDS?

Saamaynta HIV waa la kontorooli karaa weliba wawa lagu celin karaa dawwoyinka lidka ku ah HIV. Iminka wax dawo ah ma laha HIV ama AIDS. Si kasta ha haatee, cilmi-baadhista waxay sheegeysaa in badana dadka qaata dawooyinka lidka ku ah HIV in ay muddo noolaadaan oo ay fiicnadaan. Haddaad ogtahay inaad qabtid HIV waxaad qaadi kartaa talaabooyinka lagu dhimayo inaadan u gudbin cudurka dadka kale.

Sidee baa loo gudbiyaa HIV?

- ◎ Galmaada aan la isticmaalin kondhomka. Afka oo laysaga tagaa oo aan layska ilaaalinin iyana khatar ayey leedahay.
- ◎ Hooyada uurka leh way u gudbisaa ilmaha, marka uu dhasho ama uu naaska jaqayo.
- ◎ Irbadaha oo la wadaago, siriijyada ama qalabka kale ee laysugu mudo daaweynta.
- ◎ Wax dhiiga ku jira ama dhiiga oo la kala qaato iyadoon la baadhin.

Baadhista HIV

Maxaa ku lug leh baadhista?

Sanbal yar oo dhiig ah ayaa gacanta lagaa qaadayaa dabadeed waxa loo dirayaa shaybaadhka si loo baadho.

Waxa dhici karta in hore dhiigaagaga dhakhatar loogu baadhay, laakiin baadhista HIV lama samaynayo ilaa lagaa fasax qaato. Baadhista HIV oo dhami waa bilaa lacag.

Intee bay qaadaneysaa in aanan helin jawaabta?

Badanaa waxay qaadata 3 cisho oo la shaqaynayo. Wax kasta natijadu ha naqotee waxa ku siinaya shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee xirfadda u leh: Jawaabta telifoonka lagaga sheegi maayo nuqul qoraalana lagugu siinmaayo.

Maxay natijadu ii sheegeysaa?

Ma qabo HIV

Taas macneeedu ma aha ma qabtid HIV oo aan ahayn inaadan u dayacmin HIV 3dii bilood ee ka horreeyey baadhista. Haddii aad u dayacantay 3dii bilood ee u danbeeyey baadhista sheegimeyo (xiliga "daaqadda"). Wawa lagugula talin baadhista kale 3 bilood kadib markii ugu danbeysey ee aad u dayacantay HIV.

Waad qabtaa HIV

Waad qabtaa HIV. Natijadu ayaa laga eegaya baadhis labaad oo ah HIV (uma badna in khald ah) Shir qarsoodi ah ayaa la qaadaneysaa qof ku takhasusay HIV/AIDS, oo kaa taageera shuruudaha ogaanshaha cudurka iyo diyaarinta daaweynta loo baahanyayah.

Yaa ogaanaya natijada?

Natijadu aad bey qarsoodi ugu tahay adiga iyo shaqaalaha daryeelkaaga daweynta. Cidna looma sheegayo natijada adoo fasax mooyee. Natijada looma sheegayo wehelkaaga iyo cidkale toona oo ka mida qoyskiina ama saaxiibo, kaad u shaqaysid, kaad guriga ka kiraysatay, dawladda, Arrimaha Gudaha ama waaxda Soddaalka.

Halkee baan u doontaa baadhista HIV ama kala xaajoodka natijada?

Baadhitaanka waxaad ka heleysaa dhakhtarka TB laakiin waxa jira meelo kale oo aad baadhitaanka ka heleysid ama aad kala xaajoon kartid wixiim kale ee ku khuseeyaa.